


Dhalmada Partorire



 LIDA Italia
 Sara Dorthea Johannesen
 Mohamed Abdirashid
|| 4
 Soomaali  / Italiano 



LIDA Stories


lidasstories.net

Dhalmada / Partorire

 LIDA Italia
 Sara Dorthea Johannesen
 Mohamed Abdirashid (so), Andrea
Ciasca Marra (it)



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>




Selamawit waa 29 jir. Ilmaheedii ugu horreeyay ayay ku dhashay dalka Eritrea. Ayada iyo qoyskeeda ayaa halkaas waqti adag kala kulmay, markaas ayay go'aansadeen inay Talyaaniga aadaan.


...


Selamawit ha 29 anni. Ha avuto il suo primo figlio in Eritrea. La vita lì era dura per lei e la sua famiglia, così hanno deciso di trasferirsi in Italia.

Labada haveenba waxay dhaleen ilmo
 caafimaad qaba. Selamawit waxay dhashay wiil
 kale, halka Inga ee leedahay gabadh.
 Niman kooduna aad bay ugu faanayaan, oo qof
 kasta oo ay garanayeen ayay u sheegi jireen
 xaasaskooda xoogga badan iyo carruurtooda
 caafimaadka qaba.
 . . .
 Entambe le donne hanno partorito bambini
 sani. Selamawit ha avuto un altro maschiotto,
 Inga una bambina. I loro mariti erano molto fieri
 e parlavano di mogli forti e bambini sani a tutti
 quelli che conoscevano.



Inga waxay ka tagtay guriga wax yar ka hor in
 taanay gaarin 19 jir. Waxay u gurtay Norway
 waxayna halkaas ku dhashay cunuggeedii ugu
 horreeyay.
 . . .
 Inga è andata via da casa poco prima di
 compiere 19 anni. Si è trasferita in Norvegia e lì
 ha avuto il suo primo figlio.





Markii Selamawit ay uur yeelatay ilmaheedii labaad, waxay la yaabtay sida ay noqon doonto haddii ay ilmo waddan kale ku dhasho.

...

Quando Selamawit è rimasta incinta del suo secondo bambino, si chiedeva come sarebbe stato avere un figlio in un paese diverso.



Inga iyo dhakhtarkeedu waxay ku heshiiyeen inay la kulanto ummuliso si ay u hesho baaritaan joogto ah inta ay uurka leedahay. Ummulisada ayaa siisay talooyin ku saabsan cuntada iyo nasashada, iyo macluumaadka ku saabsan sidii ay nafteeda iyo ilmaheedaba u ilaalin lahayd una badbaadin lahayd.


...

Su consiglio del suo dottore, Inga è entrata in contatto con una ostetrica per effettuare controlli regolari sull'andamento della gravidanza. L'ostetrica le ha dato delle indicazioni sul cibo e sul riposo, e su come mantenere lei stessa e il bambino in buona salute e in forma.

Markii deriska Inga uu maqlay inay isku dayeyso inay ilmo dhasho, deriska ayaa u sheegay inay u tagto dhakhtar isla marka ay uur yeelato. Sidaas ayay ku hubin kartaa inay caafimaad qabaan iyada iyo ilmaheeda. Dhakhtarka ayaa u sheegay inay qaadatao kiniinka Folic acid oo ah fitamiin muhiim u ah haweenka uurka leh.

...


Quando la vicina di casa ha saputo che Inga stava provando ad avere un figlio, le ha detto di andare dal dottore non appena si sarebbe accorta di essere incinta. In quel modo avrebbe potuto accertarsi che sia lei che il bambino stessero bene. Il dottore le ha consigliato di prendere acido folico, una vitamina importante in gravidanza.




Selamawit iyo Inga waxay ka yimaadeen meelo kala duwan. Selamawit waxay dareentay badbaado sababtoo ah waxay khibrad u lahayd ummusha. Inga waxay hooyadeed kala hadashay arrimaha dhalmada.

...

Selamawit e Inga provenfono da situazioni! diverse. Selamawit si sente tranquilla perché aveva già partorito. Inga ha parlato del parto con sua madre.






Labada haweenba waxay maqleen in, inta badan dalalka Yurub, haweenka uurka leh ay xaq u leeyihiin daryeelka dhalmada ka hor. Taas macnaheedu waa in ay heli doonaan caawimo inta ay uurka leeyihiin. Selamawit waxay ballan la yeelatay dhakhtarkeeda isla markii ay xaqiiqsatay inay uur leedahay. Selamawit ninkeedii ayaa u kaxeeyay dhakhtarka.

...

Entrambe avevano sentito dire che, nella maggior parte dei paesi europei, le donne incinta hanno diritto all'assistenza prenatale. Questo significava che sarebbero state aiutate durante la gravidanza. Selamawit ha preso appuntamento con il suo dottore non appena si è resa conto di essere incinta. Suo marito l'ha accompagnata in macchina dal dottore.



Dhaqtarku wuxuu sameeyay xoogaa baaritaanno ah wuxuuna ogaaday in Selamawit ay qabto nooc ka mid ah cudurka sokorta oo haweenka uurka leh qaarkood ay qaadaan. Waxay ahayd inay cunto cunto caafimaad leh iyo inay jimicsi samayso. Selamawit way ku faraxday inay goor hore u tagtay dhakhtarka, ka hor intaanay iyada iyo ilmaheeda xanuunsan.

...

Il dottore le ha fatto fare dei test da cui è risultato che aveva un tipo di diabete che alcune donne incinte hanno. Avrebbe dovuto mangiare cibo sano e fare esercizio. Selamawit era contenta di essere andata presto dal dottore, prima che lei e il suo bambino si ammalassero.